



Sharciyada Badbaadada Rakaabka Carruurta ah ee Colorado

Juun 2024, Gov. Jared Polis waxa uu saxeexay biil/sharci cusboonaysiinaya sharciga badbaadada rakaabka carruurta ee Colorado si uu u milicsado talooyinka cilmi-baarista ku salaysan ee u dambeeyay ee ku saabsan kursiga baabuurka, isticmaalka kursiyada iyo suunka kursiga ee carruurta. Cusboonaysiinta, oo dhaqan galaysa Janaayo 1, 2025, waxay xaqijin doontaa in dadka reer Colorado ay la jaanqaadaan horumarinta dhaqamada ugu wanaagsan ee kursiga baabuurta iyo isticmaalka suunka kursiga.

Sharciyada badbaadada rakaabka carruurta ah ee Colorado, oo ay ku jiraan cusboonaysiinta dhaqangalaya Janaayo 1, 2025:

- Colorado marka la joogo, darawalka waa la joojin karaa oo tikidh ganaax ah loo jari karaa haddii ilmo da'disu ka yar tahay 18 jir uu fuulo baabuurka isagoon lahayn kursi baabuur, suunka kursiga.
- Waxyaabaha lagu xannibo ilmaha ama suunka kursiga waa in la hagaajiyaa oo loogu rakibaa gaariga sida ku cad tilmaamaha soo-saaraha.
- Dhammaan carruurtu waa inay buuxiyaan shuruudaha dhererka, culayska iyo da'da la cayimay ee xakamaynta ilmaha.
- Dhammaan waxyaabaha lagu xakameeyo carruurta inta ay saaran yihiin gaariga waa inay ahaadaan kuwo u hoggaansama Heerarka Badbaadada Baabuurta ee Federaalka. Kuraasta baabuurta ee been abuurka ah ayaa aad u soo badanaya waana arrin khatar ah. Raadi calaamad muujinaysa in kursiga carruurta uu u shatiyasan in lagu isticmaalo baabuurta si loo xaqijiyo inuu badbaado yahay.

Kuraasta u Jeeda Dhanka Dambe

- Ka yar 2 sano jir, oo **ka yar 40** rodol.
- Waa inuu ku fadhiyaa kursiga dambe haddii mid loo heli karo.
- Waxay sii isticmaali karaan kuraas u jeeda dhanka dambe wixii ka dambeeyaa da'da 2 sano iyo culays 40 rodol ah ilaa ilmaha uu ka korayo kana dhaafayo dhererka ama miisaanka xadka u ah kursiga baabuurka (lagu taliyay).

Kuraasta Baabuurka u Jeeda Dhanka Hore

- Ka yar 2 sano, iyo **in ka badan** 40 rodol.
- 2-4 sano jir, **oyo** ugu yaraan 20 rodol.
- Waa inuu ku fadhiyaa kursiga dambe haddii mid loo heli karo.
- Waxay sii isticmaali karaan kuraas u jeeda dhanka hore wixii ka dambeeyaa da'da 4 sano iyo culays 40 rodol ah ilaa ilmaha uu ka korayo kana dhaafayo dhererka ama miisaanka xadka u ah kursiga baabuurka (lagu taliyay).

Kuraasta Xoojiyaha ah

- 4-9 sano jir **oyo** ugu yaraan 40 rodol.
- Waa inuu ku fadhiyaa kursiga dambe haddii mid loo heli karo.
- Waxay sii wadi karaan isticmaalka kursiga suunka wixii ka weyn da'da 9 jir ilaa uu ilmuhi si fiican ugu fadhiisan karo kursiga isagoo xirnayn suunka kursiga.

Suunka Kursigalo

- 9-18 sano jir.
- Waa inuu si fiican ula egyahay suunka kursiga.

Wixii su'aalo ah, fadlan iskuduwayaasha Kuraasta Baabuurka ee Colorado kala xiriir
carseatscolorado@gmail.com.